



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Abril 19, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Fursada ra'yi ururinta si jawaab celin looga bixiyo baahiyaha tiknoolajiyadeed ee HIPAA oggolaatay

Sida ay u badan tahay in aad horeba uga warqabtay, waxaa nala siiyay oggolaansho inta lagu jiro xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha in aanu u isticmaalno noocyada kala duwan ee tiknoolajiyada si aanu u sii wadno bixinta adeegyada oo dadka uga dhigno kuwo badbaado leh. Iyada oo ay joogsanaysa xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha, waxaanu u baahan doonaa in aan ku soo noqono tiknoolajiyada ay HIPAA oggolaatay. ODDS waxay haysataa \$10 milyan [oo ah deeqda lacageed ee Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka \(ARPA\)](#) si hay'adaha maamulka iyo daryeel bixiyayaasha looga caawiyo in ay sii wadaan bixinta adeegyada iyo taageerada u baahan doona u hoggaansanaanta HIPAA

ODDS ayaa dejisay ra'yi ururin kooban si fikrado looga soo ururiyo hawl wadaagayaasha oo ku saabsan baahiyaha loo qabo tiknoolajiyada ay HIPAA oggolaatay. Fadlan dadka la wadaag jawaab celintaada oo ra'yi ururintani u sii gudbi dadka kale ee ay dhici karto in ay daneynayaan in ay sidoo kale yeelaan. Wakhtiga loo qabtay in lagu dhammeystiro ra'yi ururintan waa Maajo 3 waxaana laga heli karaa [bogga internet-ka ee Ka qayb qaadashada iyo Hal-abuurnimada ee ODDS](#).

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan deeqda lacageed ee ODDS ARP, fadlan email u dir ODDSARPA.funding@dhsosha.state.or.us.

Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta buuxinta ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.